# Qoraalka fiidiyowga Bayaanka Cunsuriyad-diidka ee Sinaanta U-hiiliya (PEAR)

Hoos ayaa waxaa ku qoran ereyada lagu hadlo (qoraalka hadalka) ee laga soo qaatey fiidiyowga Bayaanka PEAR ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka. Fiidiyowgan waxay, Lou McDermott, Quyen Huynh, iyo Robin Vazquez ku soo bandhigayaan dedaallada PEAR ee ay hay'adeennu wado.

## LOU McDERMOTT

Qof walba ku soo dhawoow. Qof walba ku soo dhawoow. Marka hore waa in aan ka hadalnaa waxa ugu muhiimsan, shaashadeenna waxaa ku qoran Bayaanka Cunsuriyad-diidka ee Sinaanta U-hiiliya (ama PEAR) ee hay'adeenna, kaasi oo aannu ugu hadli doonno bilowga ilaa dhammaadka fiidiyowgan. Waxaannu wax badan oo arrintan ku saabsan uga hadli doonnaa waqti yar gudahiisa. Magaceygu waa Lou McDermott, waxaanna adeegsadaa magac-u-yaalka isaga. Waxaan ahay qof dheer oo timo gaaban leh; waxaan xiranahay qoorxir buluug ah, jaakad buluug ah iyo shaati isugu jira midabyada basali iyo buluug. Waxaan ahay Agaasime Ku-xigeenka Maamulka Daryeelka Caafimaadka, oo sida kale loo yaqaanno HCA. Waxaan sidoo kale ahay taabogeliyaha loo wakiishey shaqada PEAR ee hay'adeenna. In kastoo qaar ka mid ah shaqadeenna sinnaanta caafimaadka ay tahay mid fudud, taasi oo ay ku jiraan PEAR, sinnaanta caafimaadka ma ahan wax ku cusub HCA. Maamulka HCA waa iibsadaha daryeelka caafimaadka ugu weyn ee Gobolka Washington. Waxaannu hadda u adeegnaa in ka badan 2.7 milyan oo qof annaga oo u mareyno barnaamijyadeenna Apple Health (oo sida kale loo yaqaanno Medicaid), Guddiga Dheefaha Shaqaalaha Dowladda, iyo Guddiga Dheefaha Shaqaalaha Iskuulka. Maamulka HCA ayaa sidoo kale bixiya adeegyada caafimaadka habdhaqanka ee loo fidiyo dhammaan dadka deggan Gobolka Washington, iyada oo aan la eegayn caymiska. Dadka ku qoran Apple Health, oo ku dhowaad ah 2.2 milyan oo qof. Waxaannu hoggaaminaa dedaalka lagu beddelayo daryeelka caafimaadka. Waxaannu shaqeynaa annaga oo kaashaneyna la-hawlgalayaasheenna iyo bulshooyinka degaanka si aan u xaqiijinno dadka deggan Washington in ay helaan daryeel caafimaad wanaagsan oo qiimahiisu jaban yahay. Maanta fiidiyowgan, waxaan kaga hadli doonnaa bayaanka PEAR ee HCA, kaas oo tilmaamaya ballanqaadkeenna ku aaddan hirgelinta PEAR, filashooyinka loogu talagalay shaqaalaheenna, iyo iskaashiyada aannu la leenahay bulshooyinka ku dhaqan guud ahaan gobolka. Sidaa daraadeed, waa maxay PEAR? Bisha Maarso '22, Guddoomiye Inslee ayaa ku amrey hay'adaha dowladda in ay hirgeliyaan Amarka Fulinta 22-04: Hirgelinta Buugg-ciyaareedka iyo Qorshaha Bayaanka Cunsuriyad-diidka ee Sinaanta U-hiiliya ee Gobolka Washington. Ujeeddada laga leeyahay PEAR waa in la kobciyo deegaan abuura lahaansho oo dhidibadana u aasaya dhaqanka cunsuriyad-diidka ee sinnaan u hiiliya ee loogu talagalay shaqaalaha maamulka HCA iyo dadka aan la shaqeyno iyo kuwa aan adeegno. PEAR waa qayb ka mid ah shaqada sinnaanta caafimaadka ee maamulka HCA, taas oo ah qiyam udub-dhexaad u ah hay'adeenna. Marka la joogo maamulka HCA, sinnaan caafimaad waxay uga dhigan tahay in qof walba uu leeyahay fursad cadaalad ah oo uu ku noqonayo intii suuragal ah qof caafimaadqaba. Waxaan hadda, jeclaan lahaa in aan ku wareejiyo Quyen.

## QUYEN HUYNH

Waad mahadsan tahay, Lou. Magaceygu waa DoQuyen Huynh. Waxaan adeegsadaa magac-u-yaalka iyada. Waxaan xiranahay jaakad madow, canbuur ku sawirran ubaxyo midabyo kala duwan leh, waxaanna leeyahay timo madow, oo aad iyo aad u dheer. Waxaan ahay agaasimaha sinnaanta caafimaadka ee HCA, waxaanna wada-hoggaaminaa dedaalladeenna PEAR aniga iyo Robin, oo aad waxyar ka-dib la kulmi doontaan. Waxaan ka hadli doonnaa qaybta qulqulka-hawlaha PEAR ee bayaanka PEAR. Qayb ka mid ah shaqadeenna PEAR waa in diiradda la saaro afar meelood, oo loo yaqaanno khadadka adeegga(service lines) ama qulqulka-hawlaha ee PEAR Marka Koowaad, Hoggaamin, Hawlgallo, iyo Adeegyo Tani waa horumarinta habdhaqannada iyo nidaamyada PEAR ee dhammaan heerarka dowlad goboleedka iyada oo la adeegsanayo daah-furnaan, horumarinta hay'adaha la xisaabtanka; hoggaamin lala qabsan karo, iyo isbeddel horseedayaal. Marka Labaad, Istiraatiijiyadda Xogta iyo Ka-warbixinta waa sameynta istiraatiijiyad xogeed iyo hannaan ka warbixin oo taageeraya horumarinta hay'adaha PEAR ee Washington. Tani waxay gacan ka geysaneysaa xaqiijinta in aan diiradda saareyno meelaha iyo dadka baahiyadooda ugu badan. Marka Saddexaad, Wada-shaqeynta iyo Iskaashiyada Bulshada waxay ka shaqeynaysaa xaqiijinta in bulshooyinkeenna, shaqaalaheenna, iyo la-hawlgalayaasheenna ay ka wada shaqeeyaan horumarinta iyo ka warbixinta dedaallada PEAR ee Washington. Waxaan dhiseynaa kheyraadyada iyo iskaashiyada HCA iyo kordhinta awoodda lagu weyneynayo codka bulshada. Ugu dambeyn, qulqul-hawleedka afaraad. Sinnaanta Cuddada Shaqaalaha waa maalgelinta dhaqanka iyo hay'adda PEAR. Tani waxaa loola jeedaa in aannu dhisno jawa dhuun isir ahaan kala duwan oo dhaqan ahaanna waxqabad leh oo loogu talagalay shaqaalaha gobolka ee heerar kasta. Waxaan abuureynaa fursado loogu talagalay qof kasta si uu naftiisa oo dhan u yimaado shaqada una dareemo soo dhoweyn, in la taageero, iyo in la qiimeeyo. Waxaa naga go'an xallinta dhibaatada cududda shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ka jirta gobolka, iyada oo yoolkeennu yahay abuurista shaqaale daryeelka caafimaadka ka shaqeeyo oo kala duwan oo loo siman yahay si ay ugu adeegaan Washington oo dhan. Hadda, waxaan ku wareejin doonnaa Robin.

## ROBIN VAZQUEZ

Mahadsanid, Quyen. Magaceygu waa Robin Vazquez, waxaanna adeegsadaa magac-u-yaalka iyada. Waxaan ahay qof midabka maqaarkiisu yahay midab dilan oo leh timo gaagaaban, oo oranji ah waxaanna leeyahay indho buluug khafiif ah, waxaanna xiranahay shaati cagaar ah oo galuus leh. Waxaan ahay agaasimaha kheyraadyada shaqaalaha ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxaanna dedaaladeenna PEAR wada-hoggaaminaa aniga iyo Quyen. Marka aynu joogto HCA, waxaannu isu tixgelinaa in aynu nahay isbeddel horseedayaasha sinnaanta caafimaadka. Isbeddel horseedayaal ahaan, HCA waxay ku dhiirrigelinaysaa dhammaan hawlwadeenadeenna iyo hoggaankaba: in ay ka qaybgalaan dedaallada sinnaanta iyo kala duwanaanta caafimaadka, sinnaanta iyo u-dhammaanshaha (ama DEI)—waxaa jira siyaabo badan oo looga qaybgeli karo; loo qaadan karo tabbabaro iyo ka-qaybgalka dhacdooyinka diiradda saaraya sinnaanta caafimaadka iyo DEI; muujinta iyo dhisidda kartida ku dhaqanka sinnaanta caafimaadka iyo sinnaanta iyo u-dhammaanshaha sida qayb shaqadooda ka mid ah ahaan; in ay bixiyaan oo ay kheyraadyada la wadaagaan kooxahooda iyo saaxiibadooda; ka-qaybgalka wada-sheekaysiyada ka dhacaya goobta shaqada iyo meelaha ka baxsan kuna saabsan sinnaanta caafimaadka iyo DEI; horumarka safarkooda iyo wacyigooda iyo fahamka sinnaanta caafimaadka iyo DEI. Hadda, waxaan doonayaa in aan dib ugu celiyo Quyen, taas oo ka hadli doonta Kooxda Bulshada Kala-talisa Arrimaha PEAR ee HCA (sidoo kale loogu yeero PEAR CAT). Waxay ka hadli doontaa qaybtaasi ee bayaanka.

## QUYEN HUYNH

Mahadsanid, Robin. PEAR CAT ee HCA waa la-hawlgalayaasha iyo isku-xiriiriyeyaasha bulshooyinka ee muhiimka ah. Waxaannu qiimeynaa waqtigooda, waayo-aragnimadooda, iyo aragtiyadooda gaarka ah. Xubnaha waxay door muhiim ah ka qaataan dejinta istiraatiijiyadaha sinnaanta caafimaadka ee HCA, hawlaha wada-shaqeynta bulshada; iyo wadaagista waayo-aragnimadooda shakhsiyeed iyo midda nololeed ee ku saabsan sida adeegyada iyo barnaamijyada HCA ay u saameeyaan iyo bulshadooda. In kasta oo PEAR CAT ay tahay koox cusub oo dhowaan la dhisay, waxaan ku faraxsanahay in aan wax ka barto oo aan la shaqeeyo xubnaha bulshada ee ka kala socda guud ahaan gobolka. Maadaama aynu soo gebbogabyenayno fiidiyowgan, waxaan doonayaa in aan ku celiyo waxa ay Lou nala wadaagtey dhowr daqiiqo ka hor. Hay'adeenna waxay maalgelisay PEAR. Waxaan kobcineynaa deegaan ay shaqaaluhu iyo kuwa aynu la shaqeyno iyo kuwa aan u adeegnaba ay ku dareemaan in la qiimeeyo, la ixtiraamo, oo la arko. Waxaannu dooneynaa in aynu abuurno ka tirsanaan iyo in aan gacan ka geysano in gobolkeenna uu noqdo gobol la wada leeyahay. Guddoomiye Inslee ayaa himiladan wadaagey intii uu socdey shirkii dhowaan la qabtey, ee ku saabsanaa sinnaanta caafimaadka ee gobolka oo dhan. Waxaan ku faraxsanahay in aan ku jirno safarkan cunsuriyad-diidka ee sinaanta u-hiiliya. Waxaanna kuugu yeereynaa in aad nagu soo biirto. Fadlan nagu soo booqo hca dot wa dot gov slash health dash equity (hca.wa.gov/health-equity) si aad wax badan u oggaato. Waad ku mahadsan tahay daawashadaada!